

Gacaliyeyaal Waalid,

Waalidka iyo daryeelayaasha ilmaha u soo qaada dugsiga ayaa door lixaad leh ka qaadan kara tayeynta ammaanka meelaha u dhow dugsiga. Haddii aad cunugaaga si joogto ah ama marar dhifa dugsiga ugu qaaddo, fadlan milicso habraacan iyo qaynuunnada ammaanka.

Qof kasta ayey u amaan badan tahay marka dugsigu kala sooco baabuurta iyo basaska. Halka ardayda dugsigeenna la dhigayo/laga qaadayo waa

Habraaca ku dejinta iyo ka qaadista dugsigeenna ka sokow, shufeerradu waa inay mar walba:

- Tartiib ugu wadaan gaariga deriska ku wareegsan dugsiga, xataa marka “aad daahsan tahay”. Eeg carruurta lugaynaysa, baaskiilka ku socota (wadada iyo waddo lugeeyada), ama taagan goobta baska lagu sugo.
- Ka hortag inaad baabuurkaaga la sinto baabuur wadada la dhigay ama meesha carruurta ku lugayso si aad ugu oggolaato in carruurta gaariga ka degato. Is-dhinac dhigga baabuurta ayaa xannibaya aragga carruurta kale ee gaadiidka wado. Muuqaalka ayaa sii yaraanaya marka roobku da’ayo ama xilliga barafka marka uumiga biyuhu samaysmo ama baraf ku samaysmo muraayadda gaariga.
- Ka hortag inaad ku dejiso am ka qaaddo carruurta goob jidka ka soo horjeeda dugsiga. Tan ayaa carruurta ku khasbaysa ka gudbid aan loo baahnayn ee waddooyinka mashquulka ah—inta badan baloogga dhexdiisa halkii ay ka gudbi lahayeen waddo lugeedka. Ka gudubka bartamaha baloogga ayaa khatar ah.
- Adeec dhamaan dadka calanka haya ee ardayda gudbiya. Waa sharci darro inaad ka gudubto inta calan-hayuhu calankiisu kor u taagaan yahay.
- Gaariga u wad si mas’uul ah. Wadada dhexdeeda haku kala wareegin. Ha istaagin dhinaca “khaldan” ee jidka.
- Isu diyaari inaad ka istaagto baska dugsiga marka **nalaka kore ee jaallaha ahi** ay bilig biliglaynayaan. Si taxaddar leh u wad gaariga markaad aragto nalalka jaalluhu ka bilig biliglaynayaan gaari socda ama bas taagan.
- Ka istaag baska dugsiga ay bilig biliglaynayaan **nalalka kore ee guduudka ah**, adigoo innaba u fiirinayn jihada qofka gaariga wada u jeedo. Shufeerradu waa inayan dhaqaaqin ilaa basku isu diyaariyo dhaqaa nalalka guduudanna damaan, ama ilaa inta uu kaaga gacan haadinayo wadaha basku. Taasu waa sharci.
- Bal ka soo qaad inaad gaariga dhigato meel dugsiga ka fod, isla markaasna aad cunugaaga u soo waddo am aka kaxaynayso dugsiga. Inaad socoto dhawr baloog ayaa qaadanaysa waqti ka yar inta aad u malaynayso, isla markaasna in yar saxmadda ka qaadaysa dugsiga, tayeynaysana ammaanka.
- Raac dhammaan xannibaadaha barxadaha dhigashada baabuurta. Raacid shuruucda dhigashada baabuurka ayaa banneeya is-goosyada, una sahlaya dadka lugaynaya, baaskiilada iyo baabuurta inay si ammaan ah uga gudbaan. Astamaha xannibaadyada baabuur dhigashada Minneapolis ayaa ku qoran xaashidan dhinaceeda kale.

Mahadsanid, qoysaska, waa inaad ka feejignaantaan ammaanka caruurta marka aad u qaadaysaan kana soo qaadaysaan dugsiga.

Si daacadnimo leh,

City of Minneapolis Unsigned Street Parking Restrictions

Many parking ordinances have traffic signs indicating that curbside stopping or parking is prohibited or restricted. However, some ordinances do not require signs to be posted. These ordinances address safety issues common throughout the city. To sign all of these locations is not practical. Vehicles parked in violation of these ordinances create a hazard for the safe passage of other vehicles and/or pedestrians. The most common of these parking ordinances include:

Corner clearance

Too close to a stop sign or Traffic Signal - vehicles are not allowed to park within 30 feet of the approach side of a stop sign or traffic signal unless otherwise indicated by a parking meter or traffic sign.

Blocked driveway - vehicles are not allowed to park within 5 feet of a private road, driveway, or alley.

Blocked fire hydrant - vehicles are not allowed to stop, stand or park within 10 feet of a fire hydrant, except when necessary to avoid conflict with other traffic, or in compliance with the directions of a police officer or traffic control agent.

Railroad Crossing – vehicles are not allowed to park within 50 feet of the nearest rail of a railroad crossing.

On a sidewalk - vehicles are not allowed to stop on sidewalks, sidewalk crossings or boulevards.

These ordinances discourage motorists from leaving their vehicles in a manner that would pose a safety threat or inconvenience to other drivers or pedestrians.

This letter adapted resources from:

http://apps.saferoutesinfo.org/lawenforcement/resources/driving_tips.cfm

http://www.minneapolismn.gov/parking/parking_unsigned-parking-restrictions

